THE ELECTORAL PROCESS 2020-2021

HANNAANKA DOORASHADA 2020-2021

QORSHAHA HAWL-GALKA DOORASHADA GOLAHA SHACABKA

Guddiga Hirgalinta Doorashada ee Heer Federaal (GHDHF)

CUTUBKA KOWAAD – ERGADA DOORASHADA

Qaab-dhismeedka Guddiga Xulitaanka Ergada

Guddiga Xulitaanka Ergada (GXE) waxa uu ka koobanyahay sadax oday dhaqameed iyo laba xuboond ee bulshada rayidka oo xubin kamid ah aytahay haween (kuraastii duruufa gaari ka yimaada waa laga badin karaa iyadoo dhaqaalahu ku xadidan yahay shanta xubnood). Xubnaha guddiga xulista ergada ee bulshada rayidka waxa ay ka kala imaanayaan qaybaha kala duwan ee bulshada sida hogaamiyeyaasha diinta (culimada & imaamyada), ganacsatada, aqoonyahanka, haweenka, dhallinyarada iyo dadka baahiyaha gaarka ah qaba ee ka soo jeeda beesha ama jifada kursiga iska leh. Ergada doorashada ee ka kooban 101-da ee dooranaya Golaha Shacabka waxaa soo xulaya duubabka, nabadoonada ka diiwaan gashan DXDF/Dowladda Federalka iyo Bulshada Rayidka ah (oo ka wada tirsan qabaa'ilka ama jifooyinka wadaaga kursiga) waxaana hubinaya GMDHDX.

GXE waxa uu soo xulaayaa ergada ka qaygalaysa doorashada:

1. Kursi kasta ee doorasho waxa uu yeelanaayaa hal Guddiga Xulitaanka Ergada.
2. Tirada guud ee Guddiga Xulitaanka Ergada waa 275.
3. Wadarta xubnaha GXE ugu yaraan waa 1375.
4. Beel ama Jifo kasta ee wadaagta kursi waxaa xulista ergada ku matalaya ugu yaraan 3 oday dhaqameed iyo laba xubnood ee bulshada rayidka ee jifada ama beesha.
5. Midkasta oo kamid ah 275-ta kursi waxa uu yeelanaayaa guddi xulista ergada oo gaar u ah, xubin kasta oo kamid ah waxa uu ka tirsanaana karaa hal kursi oo kaliya, marka laga reebo Guddiga Xulista Ergada ee Soomaaliland oo xubnaha kamid noqon karaan laba ama kabadan ee guddiga xulista ergada.
6. Xubin ka tirsan Guddiga Xulitaanka Ergada ma noqon karo ergo ama murashax doorashada u tartama.
7. Guddiga Xulitaanka Ergada wuxuu usoo xulayaa ergada doorshada si wadar-ogol ah. Haddii ay suurtagali waydo in si wadar-ogol ah wax u soo xulaan oday-dhaqameedyada & wakiilada bulshada rayidka, waxay ku soo xulayaan ergada cod hal dheeri ah (50%+1).

Macluumaadka iyo Wargalinta Guddiga Xulitaanka Ergada.

GMDHDX waxaa looga baahanyahay in ay Guddiga Xulista Ergada ay ku war-galiyaan hanaanka xulista ergada, GHDHF waxa uu korjoogtaynaya hannaanka. Wacyi-galinta GXE waxa ay ka dhacaysaa magaalooyinka loo asteeyay doorashooyinka

Waxaana la siindoona nuquladan hoos ku xusan:

- Foomka Guddiga Soo Xulista Ergada.
- Xeerka Anshaxa ee GXE.
- Qoraal Tilmaamaya Shuruudaha Ergada Doorashooyinka
- Foomka Liiska Ergooyinka Doorashada

GMDHDX waxa uu Guddiga Xulista Ergada u qabanaayaa hal maalin oo tababar ku saabasan hannaanka soo xulista ergada doorashada, waxaana lagu qabanaayaa goobaha codbiixnta. Guddi-hoosaadka Hawlgalada/Tababarka ee GHDHF waxa uu diyaariyay tilmaamaha tababarka.

Diiwaangalinta iyo Xulista Ergada

kursi kasta oo ka mid ah 275[ka] kursi ee Golaha Shacabka waxa dooranaya 101 ergo, iyadoo la hubinayo in qaybaha kala duwan ee bulshada ay u dhanyihiin. Guud ahaan tirada ergada ee ka qaybqaadaneysa doorashada dadban 2020/2021 ee xubnaha Golaha Shacabka waa 27,775 ergo, iyadoo ergada Somaliland ay noqonayso Ergo wadaag.

Liiska horurdhaca ergada waxaa diyaarinaaya GXE. Guddiga Xulista Ergooyinka waxa ay soo gudbinayaan liiska ergada kursi-ga ee loo qoondeeyay beesha/jifada, iyagoo adeegsanaya foomka diiwaangalinta ergada oo ay soo wada saxiixeen guddiga xulista ergada kursigaas, kaasoo caddeynaya qoondada haweenka, qaybaha bulshada ee ka qayb noqonaya ergada. Ayagoo soo raacinaya 2 sawir oo teesaraha ah xubin kasta oo kamid ah ergada, dhabarka dambe ee sawiradana uu ku qoran yahay magaca ergeyga oo afaran.

Shuruudaha Ergada

Xulashada qofka ka mid noqonaya ergada-doorashada waxaa saldhig u noqonaya shuruudahan soo socda:

1. In uu yahay Soomaali, kana tirsanyahay beesha kursiga ku heshay nidaamka awood qaybsiga ee 4.5
2. In da'diisu aanay ka yareyn 18 sano
3. In miyirkiisu dhanyahay, awoodna u leeyahay in uu codeyn karo
4. In uu fahamsanyahay masuuliyadda doorashada
5. in uusan ahayn musharrax u taagan labada aqal midkoodna
6. Inaysan maxkamadi ku ridin xukun ciqaabeed kama dambeys ah shantii sano ee ugu dambeysay kaas oo lagu mutaysanayo xabsi, waxaana laga rabaa shahaadada dambi la'aanta
7. In uusan hayn xil siyaasadeed waqtiga doorashada
8. In uusan xiriir la lahayn kooxaha argagixisada

Matalaadda Bulshada

Ergada u codeyneysa kursi walba waa in ay ka koobnaataa qaybaha kala duwan ee bulshada beesha ama jifada kursiga wadaagta, sida haweenka, dhallinyarada, ganacsatada, culuma'udiinka iwm.

1. Haweenku waa in ay ka koobnaadaan ugu yaraan 30% ee wadarta Ergada (31 ergo).

2. Dhallinyaradu waa in ay noqdaan ugu yaraan 20% ee wadarta guud ee ergooyinka (20 ergo). Da'ada dhalinyaro waa inta u dhaxaysa 18 – 35 sano.

3. Ergada inteeda kale waxay noqonayaan qaybaha kala duwan ee bulshada.

Foomka Diiwaangalinta Ergada

Foomka diiwan-galinta ergada waa inay ka muuqataa magaca dawlad goboleedka, goobaha doorashadu ka dhacayso (magaalada), lambarka kursiga, magaca oo afaran, magaca hooyada oo seddaxan, taariikhda dhalashada, goobta dhalashada iyo teleefanka ergayga. Sidoo kale foomka waa in uu ku qoranyahay magacyada, saxiixa, taariikhda, Guddiga Xulista Ergada iyo GMDHDX waxay saxiixayaan oo shabadanayan liiska hubinta ergada.

Dib-u-eegidda iyo Xaqiijinta Ergada

Marka guddiga xulista ergada uu soo gudbiyo liisaska horudhaca ee ergada waxaa kadib loo gudbinaayaa GMDHDX ee khuseysa, waa in la hubiyaa, si loo ogaado in isku dheelitirnaan sax ah lagu saleeyay beesha ama jifada kursiga wada leh, iyo in 30% liiska ergada ay haween yihiin, iyo soo gudbinta shahaadada dambi la'aanta. Haddii dib-u-ee-giddu ay muujiso in ergada aysan soo buuxin shuruudaha erganimada ama heerarka matalaadda ay qaldan yihiin hannaankan hoos ku xusan ayaa la raacaayaa.

Haddii, liiska horudhaca ah ee lasoo gudbiyay uusan waafaqsanayn shuruudaha xulista ergada, GMDHDX wuxuu ku wargalinayaa guddiga xulista ergada ee kursiga la dooranayo inay dib-u eegis ku soo sameeyaan 2 maalmood gudohood. Marka guddiga xulista ergada uu liiska ergada usoo gudbiyo GMDHDX, GMDHDX wuxuu dib-u-eegayaa oo xaqiijinayaa liisas-ka kahor inta uusan u gudbin liiska GHDHF si uu u hubiyo soo buuxinta saxda ah ee shuruudaha ka mid noqoshada ergada.

Kahor inta aan la dhamaystirin iyo kahor muddada xallinta cabashooyinka, liiska ergada waxaa loo tixgalinaayaa inuu yahay mid kumeel gaar ah. Liiska ergada ee kama danbayska ah waxa guddiga GMDHDX uu u gudbinayaa GHDHF.

Kanoqoshada iyo Dhimashada Ergada

Haddii qof ergay ah uu xubinnimada baneeyo, xaalad deg deg ah awgeed, sida dhismasho, jirro ama dano shaqsi, waa in uu soo bedelaa Guddiga Xulista Ergada, waxayna u gudbinayaan GMDHDX uu u gudbinayaa magaca xubinta la bedeley guddiga GHDHF.

Aqoonsi-siinta (ID Card) Ergada

Maalinta codeynta, ergada doorashooyinka waxay tagayaan xarunta cod-bixinta, si loo siiyo aqoonsiga codbixiyaha.

Shaqaalaha GMDHDX waxay siinayaan aqoonsiga cod-bixiyaha ergay kasta, kaas oo magaciisa ku jiro liiska la xaqiijiyay ee ergada wax dooranaysa.

Ergay kasta wuxuu soo bandhigayaa aqoosiga cod-bixiyaha ee la siiyay, mana codeyn karo aqoonsiga cod-bixiyaha la'aantiis. Kursi kasta waxaa GMDHDX u soo saarayaa 101 aqoonsi cod-bixiye ah oo kaliya. Ergada Somaliland waxa la siinaayaa hal kaar aqoonsi ee kursi kasta ee ay u

codeynaayaan. Wareeg kasta ee doorasho kadib, kaarka aqoonsiga codbixiyaha waa la-jeexayaa si aan dib loogu isticmaalin.

Imaanshaha Ergada

Ergada ayaga ayaa xil ka saaran yahay/tahay in ay yimadaan deegaan doorashada lagu codeynayo si waafaqsan jadawalka uu soo saaray GMDHDX.

Maalinta cod-bixinta, ergada doorashada waxaa lasiinaayaa warbixin ku saabsan hannaaanka iyo Xeerka Anshaxa. GHDHF waxa uu diyaarinaaya hagayaal fudud oo sharaxaya habka iyo tallaabooyinka codeynta.

CUTUBKA LABAAD: MUSHARAXIINTA

Diiwaangalinta Musharaxiinta

Ujeeddada hannaanka diiwan-gelinta musharaxa waa in fursad loo siiyo muwaadiniinta, lagana hubiyo inay buuxiyeen shuruudihii musharaxnimada.

Nidaamka & Goobaha Diiwangalinta Musharixiinta

Musharraxu wuxuu iska diiwaangalinayaa deegaan doorashada uu yaalo kursiga uu u tartamayo ee maamul goboleedka.

Goobaha Diiwangalinta Musharixiinta

Puntland	**1. Garowe** **2. Bosaaso**
Galmudug	**1. Samareb** **2. Gaalkacayo**
Hirshabeelle	**1. Jowhar** **2. Beledweyne**
Koonfur Galbeed	**1. Baydhaba** **2. Baraawe**
Jubbaland	**1. Kismayo** **2. Garbaharey**
Somaliland & Banadir	**1. Mogadishu**

Shuruudaha Musharixiinta Xubnaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

1. In uu yahay muwaadin Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.
2. In uu murashuxu ka mid yahay jifada kursiga ku heshay nidaamka awood qaysiga ee 4.5
3. Dhimirkiisu u dhan yahay.
4. Da'diisu ka wayn tahay 25 sano.
5. Aan xuquuuqdiisa/deeda muwaadinimo go'aan maxkamadeed lagu hakin shanti (5) sano ee ugu danbeysay.
6. Uu leeyahay/leedahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waayo aragnimo u dhiganta.
7. Ka tirsanayn ama wax xiiriir ah la lahayn kooxaha argagixisada ah.
8. In uu haysto/haysato warqadda danbi la'aanta ee hay'adda danbi baarista (CID) ee dowlad goboleedka. Somaliland iyo banadir waxay ka qaadanayaan heer Federal.
9. In uu dhowraya shuruudaha amniga doorashada iyo goobta codbixinta, uusanna la geli Karin wax ciidamo ah.
10. In uu u maro hanaanka sharci ee loogu tala galay wixii cabasho uu dareemo

11. Musharax kasta oo u tartamaya Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa in uu bixiyaa lacagta diiwangalinta kuna shubaa xisaabta Kootada Khasnadda Dhexe (Treasury Single Account).
12. Lacagta diiwangalinta Musharaxiinta u tartamaya Golaha Shacabka waxay noqonaysa $10,000, (Toban Kun oo dollar) oo ragga ah iyo $5,000, (shan Kun oo dollar) oo dumarka ah.
13. Lacagta diiwangalinta Musharaxiinta dib looma soo celinayo.

Qoondada Haweenka

Xildhibaanada Golaha Shacabka waa inay noqdaan ugu yaraan 30% haween. Gudiyada Doorashooyinka (GMDHDX, GHDHF, GXKHD), GXE iyo Dowladd Goboleedyada waa inay xaqiijiyaan hirgalinta kootada haweenka.

1. Beel/Jifo kasta oo seddax kursi leh in loo asteeyo mid kamid ah kuraasta in ay ku tartamaan haween oo kaliya.
2. Madaxda Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka oo gacanka helaya Guddiga Doorashada GMDHDX ayaa u astaynaya kuraasta ay u tartamayaan haweenka oo keliya.
3. Kuraasta kale ee dhiman way u furan yihiin inay ku tartamaan haweenku.

Ka Bixidda ama Dhimashada Musharaxa

Musharax kasta wuu ka bixi karaa tartanka waqti kasta kahor inta aan la daabicin liiska musharaxnimada ee kama dambeysta ah, isagoo oo buuxinaya Foomka Ogeysiinta Dib-uga-noqoshada Musharraxnimada oo laga heli karo GMDHDX.

Haddii musharax uu dhinto kadib diiwangalinta musharaxa, balse wali aysan doorashadu dhicin waxaa xaqiijinaya GMDHDX, haddii uu hal musharax oo kaliya ku soo haro tartanka, waxaa sadex (3) maalin dib loo furayaa diiwaangalinta musharaxnimada, ma jiri karto hal musharax oo kursi u tartamaya keligiis.

Diyaargarowga Saadka ee Diiwaangalinta Musharaxiinta

GMDHDX waxay xaqiijinayaan in ugu yaraan sadex (3) maalin kahor bilaabitaanka diiwaanglainta, in agab-xafiiseedka la diyaariyey, lana geeyey xarumaha diiwaangalinta musharaxiinta doorashada. GMDHDX iyo GHDHF waxay saxiixayaan oo shaabadaynaya foomka hubinta diiwaangalinta musharaxiinta.

Doorka GMDHDX iyo GHDHF ee Diiwaangalinta Musharaxiinta

Sida ku cad qodobka 8^{aad} ee waajibaadka shaqo ee GMDHDX, guddigu waxa uu qaadanayaa shaqaalo maareya diiwaangalinta musharixiinta Golaha Shacabka. Xarun kasta sadex shaqaale ayaa loo qaadanayaa. GMDHDX waa inuu hubiyaa in musharaxiinta ay buuxiyeen shuruudaha

musharaxnimada. GHDHF waxay hubinyaan dhaqangalinta habraaca diiwaangalinta musharaxiinta sida ku cad qodobkiisa 6aad ee waajibaadkooda shaqo.

Tababarada Hawl-wadeennada Diiwangalinta Musharaxiinta

Hawl-wadeennada diiwangalinta waxaa la siin doonaa tababar soconaya hal (1) maalin oo ku saabsan diiwaangalinta musharixiinta iyo xeerka anshaxa.

Xogsiinta Diiwaangalinta Musharraxa

Inta lagu gudajiro muddada diiwaangalinta musharraxa, xafiisyada diiwaangalinta ee Guddiyada waxay warbixinta xogta diwaan gelinta u soo gudbinayaan Xarumaha Hawl-gallada (Xarunta Dhexe ee GHDHF):

- Tirada musharraxiinta ee is-diiwaangaliyey.
- Tirada musharraxiinta ee aan buuxinin shuruudaha diiwaangalinta.
- Tirada ka noqoshada/ka bixidda musharaxnimo.
- Tirada wakiillada musharaxiinta.

Wacyigalinta Dadweynaha iyo Diiwaangalinta Musharaxiinta

Wacyigalin guud oo ku saabsan diiwaangalinta musharaxiinta ayaa laqabanayaa ayadoo la isticmaalaayo warbaahin kala duwan. Guddi-hoosaadka Wacyigalinta Dadweynahau ee GMDHDX ayaa qabanaayo hawshaan ayadoo muhiimada la siinaayo dadweynaha iyo ergada doorashada.

CUTUBKA SEDDAXAAD – HANNAANKA DIYAARGAROWGA COD-BIXINTA

Warbixinada Hawlgalada GHDHF iyo GMDHDX

Warbixinada GMDHDX iyo GHDHF waxay dabooli doonaan hawlaha kahor doorashada, cod-bixinta iyo hawlaha doorashada kadib, oo ay ku jiraan:

- Xaqiijinta in agabku soo gaarey Xafiisyada GMDHDX ayna joogaan wakiilada GHDHF.
- In agabka loo qaybiyay goobaha/xarumaha Cod-bixinta, wakiilada GMDHDX ay mas'uul ka yihiin Xarunta Cod-bixinta.
- Furitaanka maalinlaha ah ee goobaha/xarumaha cod-bixinta (subaxii 8:00 illaa 12:00 duhurnimo ee doorashada galinka hore, iyo 1:00 durhurnimo illaa 5:00 galabnimo ee doorashada galinka dambe)
- Iskaan marinta/Scanning, Foomka Natiijada iyo u gudbinta foomak natiijada xarunta dhexe ee GHDHF.
- Daabulaad iyo soocelinta agabka muhiimka ah (waraaqaha cod-bixinta, foomamka natiijooyinka iyo iswaafajinta, shaabadaha iyo ningaxyada lambareysan ee la adeegsadey maalinta cod-bixinta) Xafiiska GMDHDX dhammaadka hannaanka doorashada.

Xarunta Hawl-gallada ee GHDHF waxay la socon doontaa oo ay diiwaangalin doontaa horumarka laga sameeyey hirgalinta doorashada iyo wixii caqabado ah ee lala kulmey. Waxaa kale oo lagama maarmaan ah in la diyaariyo qorshaha isku-xirka iyo isku-duwidda ee hawl-galada doorashada. Sidoo kale waxaa muhiim ah in GHDHF iyo GMDHDX ay la-wadaagaan/is-dhaafsadaan warbixinada hawlgalada Guddiyada Amniga Doorashada ee Dowlad Goboleedyada.

Diiwangalinta Wakiilada Musharixiinta, Kor-joogtada Iyo Warbaahinta

Kor-joogtaynta waxay xoojinaysaa daahfurnaanta iyo la-xisaabtanka ee hannaanka doorashooyinka, sidaa darteedna waxay wanaajinaysaa ku kalsoonaanta shacabka ee hannaanka doorashooyinka. Wakiillada musharraxa ee la aqoonsan yahay, kor-joogayaasha gudaha iyo kuwa caalamiga ah waxay hubinayaan in guud ahaan hannaanka doorashada loo qabtay si waafaqsan xeerarka doorashada. Warbaahinta waxay sare u qaadaysaa oo ay xoojinaysaa daahfurnaanta doorashada, waxayna ka caawinaysaa dadweynaha inay si fiican u fahmaan hannaanka doorashooda.

Si loo hubiyo daahfurnaanta hannaanka doorashooyinka 2020/2021, wakiillada musharraxiinta, xubnaha kor-joogayaasha iyo warbaahinta waxaa si mudnaan leh loogu ogolaanayaa in ay helaan dhammaan wararka marxaladaha kala duwan ee hannaanka doorashooyinka. Si loo maareeyo hufanaan doorasho oo caddaalad ah, wakiillada warbaahinta iyo bulshada rayidka waxay u baahanayaan in ay ogolaansho rasmi ah ka helaan GHDHF iyo GMDHDX,

GHDHF iyo GMDHDX waxay aqoonsi siinayaa kor-joogayaasha doorashooyinka iyo warbaahinta ee matalaya ururrada caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah ee kor-joogteynta

doorashooyinka, waxaana lala wadaagayaa xogta ku habboon ee khuseeya hannaanka doorashooyinka, iyadoo la diyaarinaayo warbixino kooban iyo qoraalo.

Kor-joogtada iyo Warbaahinta waxay saxiixayyaan Xeerka Anshaxa ee doorashada kaas oo ku xusan xuquuqdooda iyo waajibaadka saaran. GMDHDX waxa uu Kor-joogtada iyo Warbaahinta marka ay yimaadaan goobaha cod-bixinta siinayyaa astaanta korjoogtada. Astaanta waxa ku qoran magaca wakiilka iyo hey'adda ama warbaahinta uu ka socdo, waxayna ansax tahay inta lagu gudajiro geedi-socodka doorashada.

Aqoonsiga wakiilada musharaxiinta waxay suuragal tahay kaliya marka la dhameystiro liiska musharaxiinta kahor bilaabitaanka cod-bixinta.

Habraaca Ruqsad-siinta Wakiilada inta lagu gudajiro Geedi-socodka Doorashada.

Kor-joogayaasha la aqoonsanyahay iyo warbaahinta waxay xaq u leeyihiin in ay korjoog ka noqdaan dhammaan Goobaha Codbixinta doorashooyinka, haddii falalkoodu aysan carqaladaynaynin hannaanka doorashooyinka.

Wakiillada musharaxiinta ee la siiyey aqoonsiga, waxay korjoogteyn karaan hannaanka doorashooyinka, sida qaybinta agabka muhiimka ah, cod-bixinta, tirinta codadka iyo ku dhawaaqidda natiijada. Marka la joogo xilliga codeynta, waana in ay:

- Hubiyaan in astaantooda aqoonsiga si fudud loo arki karo.
- Ixtiraamaan xeerka anshaxa, habraacyada doorashada, iyo go'aamada rasmiga ah ee Guddiyada Doorashooyinka.
- Gudbinta cabasha kasta ama aragtida wax isdaba marinta iyagoo u maraya hababka rasmiga ah, ma aha in ay ka sheegaan meel fagaare ah ama warbaahinta;
- Ka fogaadaan in ay go'aamo gaaraan ama in ay ku celceliyaan natiijooyin ama tirooyin, ay soo saareen ilo aan rasmi ahayn;
- Ka fogaadaan abuurista, ku celcelinta ama ka qayb-qaadashada wararka aan sugnayn ee la isla dhexmarayo; waana in ay ka fogaadaan adeegsiga ereyada ama bayaanada keeni kara kala qaybsanaan, takoor ama gacan ka geysan kara xiisadaha jinsiga, isirka, qabiilka ama kuwa gobolleysiga.

Inkasta oo ay taleefoonada gacanta ku haysan karaan xarunta cod-bixinta, korjoogayaasha waa in ay ixtiraamaan sir-nimada codka doorashada, sidaa darteedna waxaa laga doonayaa inay ka fogaadaan adeegsiga kaamirada, aaladaha wax duuba ama Internet-ka si ay u soo bandhigaan cidda uu ergiga u codeeyaya.

Si loo xafido xogta xaasaasiga ah, waa in warbaahintu aysan duubin ama sawir ka qaadin ergooyinka marka ay calaamadaynayaan warqadda cod-bixinta si aan loogu xad-gudbin xaq-soorinimada codeynta.

Cayimidda Goobaha Cod-bixinta

Si cod-bixinta loo hirgeliyo, waxaa loo baahanyahay diyaarinta iyo isku-dubaridka shaqaalaha, agabka iyo codbixi-yeyaasha. Dhammaan agabka doorashada waa in la daabullaa kahor tababarada iyo cod-bixinta.

Shaqaalaha Cod-bixinta waxay u baahan doonaan in si fiican loo tababaro si ay u fuliyaan hannaanka doorashada, xarumaha cod-bixinta waa in horey loo sii diyaariyo, si codbixi-yeyaasha iyo daneeyeyaasha loogu wargalliyo xarumaha cod-bixinta.

Dowlad Goboleedka/Maamul	Magaalada	Kuraasta/ Doorashooyinka	Goobaha Cod-bixinta	Goobaha Dheeraad ka
Somaliland	Mogadishu	46	2	
Puntland	Garoowe	21	1	
	Bosaaso	16	1	
Galmudug	Dhuusamareeb	26	1	1
	Galkacyo	11	1	
Hirshabeelle	Jowhar	13	1	1
	Beledweyne	25	1	1
Benadir	Mogadishu	5	1	
Koonfur Galbeed	Baydhaba	43	2	1
	Barawe	26	1	
Jubaland	Kismaayo	27	1	
	Garbaharey	16	1	
Wadarta		**275**	**14**	**4**

Cod-bixinta waxay soconaysaa 20 maalmood, iyada oo ay ka dhacayso 12 deegaan doorasho, oo leh 12 xarumo ee codbixin iyo 18 goobood ee codeynta, ee laga hirgelinayo 5ta dowlad-goboleed iyo gobolka Banaadir, sida ku cad jadwalka kore.

Si dhamaan diyaargarowga qabashada doorashada loogu guuleysto, waxaa loo baahan yahay in si cad loo qeexo hanaanka iyo hawlaha la qabanayo, sida; waqtiyada, waajibaadka, waxaana ka mid ah kuwan soo socda:

- Cayimidda iyo qoondeynta xarumaha cod-bixinta
- Qiimeynta isgaarsiinta iyo ammaanka
- Diyaarinta xarumaha, oo ay ka mid yihiin xarumaha kaydka
- Soo-iibinta agabka iyo qalabka cod-bixinta

- Helitaanka, eegista, baakadaynta iyo calaamadeynta agabyada kale ee kala duwan ee tababarka, wacyigalinta shacabka iyo doorashooyinka
- Shaqaalaynta, tababarka iyo gaynta shaqaalaha
- Qorshaynta dhaqdhaqaaqa iyo gaarsiinta xarumaha cod-bixinta

Xarumaha iyo Goobaha Cod-bixinta:

Xarunta cod-bixinta waa dhismaha ay ergooyinka ku dhiibanayaan codkooda maalinta cod-bixinta. Xarun-kast ee codbixin waxay yeelan doontaa goobo codbixin, qolal gooni ah, ama meel kamid ah gudaha xarunta cod-bixinta. Xarumaha cod-bixinta ee Soomaaliland iyo Baydhaba waxay yeelan doonaan laba goob codbixin oo ku dhex yaala gudha dhismaha. Goob codbixin kasta waxaa lagu qaban doonaa doorashada kuraas gaar ah sida ku xusan jadwalka GMDHDX.

Ku Yaallaan Xarunta Cod-bixinta Doorashada

Xarumaha cod-bixinta waxay noqon doonaan xarumo ay bixiso dowladda, tusaale ahaan, Xarumaha Gobolada/Degmooyinka iyo dhismayaasha kale ee magaalooyinka ay doorashooyinku ka dhacayaan.

Qaadashada Shaqaalaha Ka hawl-Galaya Goobaha Cod-bixinta

Hufnaanta, dhexdhexaadnimada iyo daahfurnaanta ee hawlgudashada hawl-wadeennada cod-bixinta waxay muujinaysa hufnaanta hannaanka doorashada, waxayna noqonaysaa halbeeg muhiim u ah xaqiijinta in natiijooyinka ay noqdaan kuwa cad oo aan lagu murmin. Mabaa'diida hufnaanta iyo daahfurnaanta waxaa lagu xoojinayaa qorshaha tababarka si loo hubiyo awoodda hawl-wadeennada inay wanaagsantahay. Waxaa muhiim ah GMDHDX in uu xaqiijiyo in ugu yaraan 30% ee shaqaalaha cod-bixinta ay noqdaan dumar.

Nidaamka Lacag-siinta shaqaalaha: Marka ay dhammeystaan waajibaadkooda, hawl-wadeennada cod-bixinta waxaa la siinayaa lacag isku xiran oo hal mar la bixiyo, iyada oo loo eegayo ama ku jaan go'an tirada maalmaha ay shaqeeyaan iyo tababarka qaateen balse ku xiran jagada shaqadooda.

Shaxda Hoose Waxaa Ku Muujisan Jagada Iyo Tirada Shaqaalaha Cod-bixinta.

Dowladd Goboleedka	Puntland	Galmudug	Jubaland	Hir-Shabelle	Konfur Galbed	Somaliland	Banaadir	Wadarta
Kuraasta	37	37	43	38	69	46	5	275
Ergada	3,737	3,737	4,343	3,838	6,969	4,646	505	27,775
Goobaha Cod-bixinta	2	3	2	4	4	2	1	18
Maamule xarunta cod-bixinta	2	2	2	2	3	2	1	14
Sarkaalka Aqoonsiga	2	2	2	2	3	2	1	14
Bixiyaha Waraaqaha Cod-bixinta	2	2	2	2	3	2	1	14
Qofka Maamula Sanduuqa Waraaqaha Cod-bixinta	2	2	2	2	3	2	1	14
Qofka Maamula Safka	2	2	2	2	3	2	1	14
Wadarta Shaqaalaha ee La Shaqaalaysiinayo	10	10	10	10	15	10	5	70
Tirada Maalmaha	20	20	20	20	20	20	20	

Hawl-wadeennada Xarunta iyo Goobaha Cod-bixinta

Tirada hawl-wadeennada cod-bixinta doorashada waxaa lagu go'aamiyay tiro shan shaqaale ee goob codbixin kasa. GMDHDX ayaa ka mas'uul ah maamulka guud iyo taageerada waaajibaadka xarumaha cod-bixinta.

Hawl-wadeennada cod-bixinta waxaa laga shaqaaleysiinayaa degaanada doorashada lagu qabanaayo. Hawsha shaqaaleyntooda waxaa qaban doona GMDHDX. si loo hubiyo heerka waxbarasho ee hawl-wadeennada codbixnta, shaqaalaynta waxaa si gaar ah diirada loogu saari doonaa muwaadaniinta haysta shahaadada dugsiga sare ama jaamacadda.

Warbixin-siinta iyo Tababarka Shaqaalaha Doorashada

Qaybta Hawlgalada (Tababarka) GHDHF iyo GMDHDX waxay iska dhex xulaayaan tababarayaal (ugu yaraan 2 ama 3 xubnood ee GMDHX-kasta). Tababarayaasha waxaa lagu tababarayaa habka loo diiwaangaliyo musharaxiinta, warbixin-siinta ergada, codeynta iyo habraaca tirinta codadka iyo waajibaadka laxariira maamulka. Guddiga Hawlgalada GHDHF oo kaashanaya tababarayaasha GMDHDX waxay si wadajir ah u diyaarinaayaan casharada tababarka iyo habka

warbixin-siinta ergada. Shaqaalaha cod-bixinta waxaa tababar siinaya GMDHDX. Tababarka waxaa lagu qabanayaa xarumaha cod-bixinta, waxaana korjoogtaynaya GHDHF.

Tababarka Shaqaalaha Cod-bixinta

Laba maalmood ayaa la tababari doonaa shaqaalaha cod-bixinta. Tababaro horudhac ah oo lagu muujinaayo habka tabarka sida warbixin-siinta ergada, codeynta iyo tirinta ayaa laqaban doonaa si loo xaqiijiyo fahamka guud ee tabarka. Tababarayaasha GHDHF iyo GMDHDX waxay caawin doonaan hannaanka cod-bixinta.

Tababarka waxaa loo nidaaminayaa hab waxbarasho oo laga wada qaybqaato is-dhexgalna leh, iyada oo la tixgelinayo inta badan ka qaybgalayaasha in ay u shaqeyn karaan sida hawlwadeenada doorashada markii ugu horaysay. waxayna ku tiirsanaan doontaa doorar jilid iyo iska dhigid si loo hubiyo in dadka la tababaraayo ay fahmeen ayna u diyaarsan yihiin in ay hirgaliyaan habraacyada tirinta codadka iyo cod-bixinta. GHDHF waxa uu GMDHDX la wadaagayaa habka iy jadwalka tabarka jadwalka oo waafaqsan jadwalka guud ee doorashada.

Daabacaadda Waraaqda Cod-bixinta

Warqadaha cod-bixinta waxaa lagu daabici doona xarunta dhexe ee GMHDX, waxaan korjoogtaynaya GHDHF, waxaana lagu diyaarinayaa Mugadishu waxaana lagu daabacayaa Goobaha codbixinta.

Tirada waraaqaha cod-bixinta

Tirade Kuraasta Golaha Shacabka	Tirada Ergada	Tirada waraaqa-ha cod-bixinta ee caadiga ah	Tirada waraaqaha cod-bixinta ee dhici karta in loo baahdo	Wadarta Waraaqaha Cod-bixinta	Tirada baakada-ha waraaqaha cod-bixinta
1	101	101	9	110	1

Wareega koobaad, tiro guud 30,250 oo warqad codbixin ayaa la daabaci doonaa, 275 x 110 = 30250 waraaq codbixin ee ergada 101 ee jooga goob codbixin kasta, oo lagu kordhinaayo 10% oo ay dhici karto in loo baahdo. Haddii ay dhacdo wareeg labaad, foomka natiijooyinka wareegga koowaad ayaa loo dhammeystiri doonaa, ka dibna GMDHDX ayaa diyaarin doona waraaqaha cod-bixinta ee wareegga labaad iyo wareegyada kale, GMDHDX waxa uu kaliya daabacayaa tiro lamid ah tirada ergada ee jooga goobta cod-bixinta.

Astaamaha Waraaqaha Cod-bixinta

Waraaqaha cod-bixinta ee 2020/21 waxaa loo sameyn doona sida ugu fudud ee suurtagalka ah. Iyada oo uu nidaamka doorashooyinka uu yahay aqlabiyad (2/3) ee kooramka soo xaadirey. Codbixiye kasta waa inuu calaamadeeyo waraaqda cod-bixinta hal mar, hal musharrax iyo calaamadeynta tilmaanta loogu talagalay waraaqda cod-bixinta.

Astaamaha Gaarka u ah Warqadda cod-bixinta

- Dhammaan waraaqaha cod-bixinta waxaa ku taxan magacyada musharaxiinta oo lambareysan.
- Magacyada musharraxiinta waxaa loo soo bandhigi doonaa qaabka ay alif-beetada ugu kala horeeyaan.
- Tilmaanta loogu talagalay calaamadeynta waraaqda cod-bixinta waxaa sidoo kale ay ku caddahay xagga sare ee waraaqda cod-bixinta.
- Warqadaha cod-bixinta waxay yeelan doonaan astaan ammaan ah.

Daabulidda iyo Dib Ugu Soo Celinta Agabka Doorashooyinka

Agabka doorashada waxaa lagu daabullayaa diyaaradaha UNSOS iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee Soomaaliya. GHDHF waxa uu diyarinayaa qorshaha daabulidda iyo soo celinta, sida daabulidda agabka doorashada ee laga qaadaayo ama la keenaayo Muqdisho iyo goobaha cod-bixinta. Qorshaha waxa ku xusan taariikhda, caddadka, goobaha loo rabo iyo nooca agabka. GHDHF waxa kale uu diyaarinaaya foomamka maamulka iyo habraacyada laga maarmaanka u ah daba-galka iyo kala-wareejinta alaabta muhiimka iyo kuwan aan muhiimka ahayn. Marka agabka la geeyo goobaha cod-bixinta waxaa ilaalintooda iyo keydintooda mas'uul ka ah GMDHDX, waxayna diyaarinayaan qorshahooda gaarka ah ee saadka loogu talagalay hannaanka cod-bixinta.

Agabka Muhiimka ah iyo Kuwa Aan Muhiimka Ahayn

Agabka Muhiimka ah iyo Kuwa Aan Muhiimka Ahayn: Agabka doorashooyinka waxaa loo kala qaybiyaa mid muhiim ah iyo mid aan muhiim ahayn. Agabka muhiimga ah waa agab haddii ay wax gaaraan saamaynaya habsami u socodka hanaanka doorashada. Agabka aan muhiimka ahayn waa kuwa loo baahan yahay si loo qabto hannaanka doorashada, haddii uu lumo ama waxyeello gaarto, lagu beddeli karo muddo gaaban, oo uusan khatar gelinayn hawlgalka.

Agabka muhiim ah: Kuwan waxaa ka mid ah waraaqaha cod-bixinta, foomamka natiijooyinka iyo iswaafajinta, shaabadaha iyo ningaxyada lambareysan ee ay tahay in la adeegsado maalinta cod-bixinta. Agabyada waa la baakadayn/xirxiri doonaa. Hagaha cod-bixinta iyo tirinta codadka ayaa tilmaamaya sida loo kala soocayo loona kala xir xiraayo agabka muhiimka ah kadib tirinta cododka iyo xilliga soo celinta.

Agabka Aan muhiimka Ahayn: waxaa ka mid ah sanduuqyada waraaqda cod-bixinta oo maran, daahyada cod-bixiyaha, xirmada alaabta xafiiska ee xarumaha cod-bixinta (Polling stations) oo ay ka mid yihiin foomamka la soo daabacay iyo stickers, alaabta xafiiska, qalabka, oo loola jeedo; laabtoobka/laptop, borojeektar/projector, makiinada daabacaadda/printer, UPS, kaamirada fiidiyowga, cod-baahiyeyaasha.

Xirxiridda/baakadaynta iyo calaamadeynta

- Xirxiridda/Baakadaynta Agabka: Habraacyo baakadayn adag iyo habab lagu kontaroolayo tayada ayaa waxaa sameynaya oo hirgalinaya GMDHDX.

- Dhammaan agabka muhiimka ah iyo kuwa aan mihiimka ahayn waxaa lagu soo xirxiri doonaa goobahay yaalaan.
- Dhammaan xirmooyinka/baakadaha ee cod-bixinta waxaa loo calaamadeynayaa si ku habboon macluumaadkan soo socda: waxa ku jira, tirada, lambarada tixraaca ee isdabajooga ah, summadda xarunta cod-bixinta, cinwaanka xarunta cod-bixinta, Dowlad-goboleedka iyo magaalada ay xarunta cod-bixintu ku taallo.

Kaydinta Agabka Cod-bixinta

Haddii xarunta cod-bixinta iyo kaydinta ay ku yaallaan isla hal meel, agabka waxaa la geynayaa xarunta cod-bixinta maalinta doorashada (E-Day). Dhanka kale, haddii xarunta kaydka ay ku taallo meel masaafo badan u jirta xarunta cod-bixinta ama haddii dhaqdhaqaaqa uusan ahayn mid ammaan ah, agabka waxaa loo qaybinayaa xarunta cod-bixinta 1 ama 2 maalmood ka hor maalinta doorashada. Iyada oo lagu saleynayo xaaladda jirta, Maamulaha xarunta cod-bixinta ayaa go'aaminaya, isaga oo la tashanaya qaybta Hawlgallada ee GMDHDX, marka agabka la geynayo xarunta cod-bixinta.

Agabka ay Dhici Karto in Loo Baahdo

Goob cod-bixin kasta waxay helaysaa xirmada cod-bixinta ee kursiga/doorashada ee goobta cod-bixinta ay qabanayso. Agabka goobta cod-bixinta ee harsan (sanduuqyada waraaqaha cod-bixinta, qolqolka codaynta, qalab xafiiseedka, iwm.) ee dhici karta in loo baahdo waa la bixinayaa waxaana la dhigayaa Xafiisyada GMDHDX waxaana la keenayaa marka uu codsado maamulaha goobta cod-bixinta.

Shuruudaha geynta agabka ay dhici karto in loo baahdo:

Haddii ay waxyeello gaarto ama uu burburo agab inta loo sii wado xarunta cod-bixinta ama inta uu ku kaydsan yahay xarunta cod-bixinta, marka ay jirto xaaladahaan; maamulaha Xarunta Cod-bixinta wuxuu ogolaasho ka raadinayaa Xafiiska GMDHDX si loo keeno xirmada qalabka goobta cod-bixinta oo dhammeystiran. Hal xirmo ayaa la keenayaa goob cod-bixin kasta ee la saameeyay.

Tirada dheeraadka ah ee dhici karta in loo baahdo ee agabka doorashada ee kala duwan oo ay ka mid yihiin agabka muhiimka ah waa in la qorsheeyaa. Agabkan waa in lagu hayaa xarunta keydka ee xafiis kasta ee GMDHDX, waa in horey loo soo xirxirey lana soo baakadeeyay. Waana muhiim in agabka dheeriga ee ay dhici karto in loo baahdo loo keydiyo si amaan ah. Agabka waxaa la siideynayaa marka loo baahdo oo GMDHDX uu ansixiyo.

Haynta iyo Daryeelka Agabka: Haynta agabka wuxuu u baahan yahay in uu hoostago GMDHDX-yada. Agabka dheeriga ah ee dhici karta in loo baahdo waxaa lagu haynayaa oo lagu sugayaa kunteenar gooni ah, oo leh laba quful, oo dhexyaala xarunta kaydka dhexe ama xarunta kaydka oo ku taal meel ku dhaw goobta cod-bixinta. Inta lagu gudajiro geedi-socodka doorashada, warqadaha cod-bixinta ee la daabacay waxaa haynayya GMDHDX.

Qaybinta iyo Kaydinta: Marka laga helo codsi xarumaha cod-bixinta, agabka muhiimka ah iyo midka aan muhiimga ahayn ee dhici karta in loo baahdo, waxaa goobta geynaya GMDHDX oo kaashanaya xoogagga amniga. Waxaa lagu wareejinayaa Maamulaha Xarunta Cod-bixinta, waana in lagu kaydiyyaa goob ammaan ah.

*Xarumaha Kaydka***:** waxaa jiri doona laba (2) keyd Xarumaha Kaydka:

- Kaydka dhexe ee Muqdisho waxaa mamuli doona GHDHF.
- Xarunta kaydka ee Dowladd Goboleedyada, waxaana maamuli doona GMDHDX.

Daabulaadda Agabka: Agabka laga soo qaadayo Muqdisho ee la geynayo xarumaha cod-bixinta, waxaana loo adeegsanaya qorshaha daabulidda ee GHDHF, iyadoo la kaashanaayo GMDHDX iyo xoogagga amniga.

Dib U Soo Celinta iyo Kala-Wareejinta Agabka

Saraakiisha GMDHDX waxay kala soo-caayaan agabka cod-bixinta ee la isticmaalay iyo kuwa aan la isticmaalin, waxayna ku wareejinaayaan Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka (GMDQ) iyo dowlad goboleedka. Sanduuqyada waraaqaha cod-bixinta ay ku jiraan waraaqaha cod-bixinta, foomamka natiijooyinka iyo agabka muhiimka ah waa in si taxadar leh loogu kaydiyo xafiiska GMDHDX illaa natiijada kama dambayska lagu dhawaaqo.

Agabka iyo qalabyada loo isticmaalay doorashada dad-ban waxaa lagu wareejinaayaa GMDQ iyo dowlad goboleedka. Dhamman agabka waxaa loo kala soocayyaa kuwa muhiim ah iyo kuwa aan muhiim ahayn. Agabka dheeriga ah waxaa lagu wareejinaayaa xafiiska GMDQ ee Dowladd Goboleedka, agabka kale ee laga soo celiyaya goobaha kale ee cod-bixinta waxaa lagu wareejinayaa Xarunta Dhexe ee GMDQ.

CUTUBKA AFRAAD - HANAANKA COD-BIXINTA

Wakhtiga furitaanka iyo xiritaanka goobaha codbixinta ee doorashada Golaha Shacabka

Goob cod-bixin kasta waxay qabanaysaa laba doorasho maalintii, hal waxaa la qaban doona subaxdii laga bilaabo (08:00am-12:00pm), midda kalena waxaa la qaban doonaa gelinka dambe laga bilaabo (01:00pm ilaa 05:00pm).

Hadal Jeedinta Musharaxiinta ee Maalinta Doorashada

Kursi kasta waxaa dooranaya ergo-doorasho oo ka kooban 101 qof oo ergooyin ah, marka laga reebo kuraasta Somaliland oo ergada dooraneysa xildhibaanada Somaliland ay noqanayaan kuwo ergo-wadaag ah, iyadoo la tixgelinayo duruufaha u gaarka ah. Ergooyinka ay xaqiijiyeen GMDHDX-yada iyo GHDHF ayaa imaanaya xarunta doorashada maalinta ay dhaceyso doorashada si loo siiyo kaarka Aqoonsiga Cod-bixiyaha.

Ololaha Doorashada: GMDHDX kasta wuxuu xaqiijinayaa in musharrax kasta uu fursad muddo 5 ilaa10 daqiiqo maalinta codeynta, si uu ula hadlo ergada doorashooyinka la soo xulay ee u codeenayo kursigaas. Habka ay u kala hormarayaan musharraxiinta si ay ula hadlaan ergada dooranaysa waxay la mid noqonaysaa habka kala dhignaanta musharraxiinta ay ugu kala horeeyaan waraaqda (Alfa-beet).

Xafiiska GMDHDX ayaa diyaarinaya jadwal leh taariikhda iyo waqtiga saxda ah ee loogu talagalay doorashada kursi kasta. Ergooyinka doorashada waxaa soo raacaya xubnaha Guddiga Xulista Ergada (ayadoo wax kharash dheeri ah aan ku baxaynin) ee soo gudbiyey ergo-doorashada kursigaas, waxayna xaqiijinayaa aqoonsiga mid kasta oo ka mid ah 101 ergada si loo siiyo kaarka cod-bixinta.

Jadwalka iyo Wakhtiga Cod-bixinta

Goob cod-bixin kasta waxay qabanaysaa laba doorasho maalintii, hal waxaa la qaban doona subaxdii laga bilaabo (08:00am-12:00pm), midda kalena waxaa la qaban doonaa gelinka dambe laga bilaabo (01:00pm ilaa 05:00pm). Wax doorasho ah lama qaban karo habeen iyo maalin jimce ah.

Hannaanka cod-bixinta caadiga ah waxay qaadanaysaa mudada kor lagu asteeyey in lagu dhammeeyo oo ay ka mid tahay tirinta codadka taasi oo dhacaysa isla markiiba ay dhamaato cod-bixinta. Dhammaan ergooyinka ayaa joogaya xilliga cod-bixinta iyo tirinta codadka si loo muujiyo daahfurnaanta.

Qiyaasaha Waqtiyada ay Ku-beegmayaan Codaynta iyo Tirinta Codadka	
Hannaanka	waqtiga uu qaadanayo hannaan kasta:
Nidaaminta kor-joogayaasha/u xog waran Ergada	20 daqiiqo
Bilow	
• Hubinta/Iswaafijinta Magacyada iyo Aqoonsiyada ergada. • Jebinta Aqoonsiga Cod-bixiyaha & Bixinta Warqadda Codeynta oo shaabadeysan. • Codeynta Cod-bixiyaha	101 daqiiqo
• Tirinta Codadka la bixiyey • Diiwaan-gelinta waraaqaha codeynta • Diiwaan-gelinta Natiijada	30 daqiiqo
• Nuqul ka sameynta natiijooyinka rasmiga ah	5 daqiiqo
• U diyaargarow wareegga xiga haduu uusan musharax guuleysan	10 daqiiqo

Iyada oo lagu saleynayo, sida ay u kala horeeyaan doorashooyinka waxaa la daabici doona xilga la dhamaystiro liiska musharaxiinta. Ergadana waa in ay yimaadaan goobta codeynta ugu dambeyn 30 daqiiqo ka hor inta doorashadooda aysan bilaabanin.

Hannaanka Codbixinta

Codaynta waxay u dhaceysaa nidaamkan soo socda:

Diyaarinta goobta cod-bixinta: habeenka ka-horeeya cod-bixinta goobta ayaa lagu diyaarinayaa dhammaan agabka aan muhiimka ahayn, waxaana la dhigayaa goobta-cod-bixinta xaruntana waa la nadiifinayaa.

GMDHDX ayaa xaqiijinaya in agabka hoos ku xusan lagu diyaariyay goobta cod-bixinta

- Kuraasta dhammaan ergooyinka.
- Kuraas iyo miisas loogu talagaley xubnaha labada guddi.
- Kuraas iyo miisas loogu talogalay hawl-wadeenada
- Kuraasta loogu talogalay musharaxiinta, korjoogeyaasha, warbaahinta iyo wakiilada musharraxiinta
- Xirmooyinka codbixinta

- Sanduuqyada cod-bixinta
- Warqadaha cod-bixinta

Hawlwadeenada goobaha codbixinta waxay xiranayaan labis muujinaya inay yihiin hawlwadeenada Guddiyada Doorashooyinka ee u xilsaaran hawsha doorashada.

Ka hor intaan la bilaabin cod-bixinta, hawl-wadeenada doorashada waa in ay goobta ku diyaarinayaan agabka muhiimka ah ee codaynta, iyada oo ay joogaan xubnaha GMDXHD, GHDHF iyo ergooyinka, goob-joogna ka yihiin musharaxiinta, kor-joogeyaasha, warbaahinta iyo wakiilada musharraxiinta. Waxayna hubinayaan in waraaqaha cod-bixinta iyo foomamka natiijooyinka ay diyaarsan yihiin.

Kooramka: Si beel/jifo loogu qabto doorasho kursi, kooramka na la buuxiyo, ugu yaraan waa inay soo xaadiraan 67% ee ergada doorashada oo u dhiganto lixdan iyo todoba ugu yaraan (67) ergo, haddii kooramka aanan la buuxin, wuxuu sii ahaanayaa mid bannaan ilaa iyo inta laga gaarayo buuxinta kooramka egrada kursigaas.

*Tirinta Ergada***:** Dhammaan ergooyinka waxay soo gali doonaan goobta cod-bixinta. Hawl-wadeenada goobta cod-bixinta ayaa hubinaayaa liiska ergada. waxaana kormeeraya Guddoomiyaha Goobta ay Cod-bixinta ka dhacayso iyo wakiilada u jooga GMDHDX & GHDHF.

Marka hannaanka cod-bixinta la bilaabo, albaabada waa la xirayaa qofka maamulaya goobta cod-bixinta uma ogolaanayo in uu soo galo qof kale. Haddii kooramka 67 Ergooyinka la soo buuxiyo, cod-bixinta way bilaabaneysaa.

Haddii kooramka aanan la soo buuxin waqtiga doorashada kursigaasna la dhaafo, doorashada kursigaas waa la hakinayaa, GMDHDX ayaa asteenayaa waqti kale.

Shuruudaha Furitaanka Cod-bixinta: Cod-bixintu waxay bilaaban kartaa haddii shuruudahan hoose la soo buuxiyo:

- In Guddoomiyaha Goobta Cod-bixinta ee GMDHDX, wakiilka GHDHF iyo hawl-wadeenada cod-bixintu ay dhammaan joogaan.
- In Kooramka ergooyinka la buuxiyay uga yaraan (67+ ergo)
- In Guddoomiyaha Goobta Cod-bixinta uu ku qancin amniga uu wanaagsan yahay

Hakinta Cod-bixinta: Guddoomiyaha Goobta Cod-bixinta ee GMDHDX wuxuu go’aamin karaa in uu hakiyo cod-bixinta, haddii xarunta cod-bixinta loogu hanjabo, rabshado, mudaaharaad iyo dhacdo kasta oo kale oo ka dhigaysa cod-bixinta mid aan suurtagal ahayn ama halisgelinaysa nolosha hawl-wadeenada iyo cod-bixiyeyaasha.

Sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtagalka ah kadib joojinta cod-bixinta, Guddoomiyaha Goobta Cod-bixinta waa in uu ku wargeliyo Xafiiska GMDHDX, kaas oo asagana ku wargelinaya Xafiiska GHDHF. Haddii xaalada amniga ay saamaxdo, doorashada dib ayaa loo bilaabaayaa, hadii kale kursiga la hakiyey GMDHDX ayaa asteyn doonaa maalin kale si loo qabto doorashada.

*Kor-joogteyn***:** Wakiilada musharraxa, kor-joogeyaasha iyo warbaahinta waxaa loo oggolaanayaa in ay galaan goobaha cod-bixinta si ay u kor-joogteeyaan cod-bixinta si waafaqsan habraacyada cod-bixinta iyo xeerarka anshaxa. Guddoomiyaha goobta cod-bixinta iyo hawl-wadeenada xarunta cod-bixinta waxay awood buuxda u leeyihiin in ay ka dhaqan-geliyaan habraacyada, xeerarka anshaxa goobahaas.

Habraacyada cod-bixinta: Habraacyada waxay tilmaami doonaan xeerarka ku saabsan sida loo hirgaliyo hannaanka, sidaa awgeed waa muhiim in si cad loo faahfaahiyo, si loo hubiyo, habraacyada cod-bixinta iyo tirinta codadka oo faahfaahsan ayaa la sameynayaa. Habraacyada waxa ay sharxayaan tallaabooyinka cod-bixinta iyo tirinta codadka, waxay tilmaamayaan agabka iyo foomka la adeegsanayo xilliga hannaanka cod-bixinta iyo tirinta codadka.

Habraacyada cod-bixinta waxay tilmaami doonaan hannaan cod-bixin fudud oo loo qaabeeyay in uu kor-u-qaado daahfurnaanta, iyada oo la xaqiijinayo sirta waraaqda cod-bixinta. Qolqolka lagu dhigayo goobta cod-bixinta waxaa loo diyaarinayaa in ay u ogolaadaan ergay kasta in uu codkiisa u dhiibto si sir ah, waxayna noqonaysaa meel qof kale uusan geli karin.

Habka calamadinta warqadda codbixinta

Marka codbixiyaha uu dhiibanayo codkiisa waa inuu calamadiyaa goobta goobaabinta ah ee loogu tala galay in uu calamadiyo (calamad "✓" ama "**X**'')

Ha"ddii meel goobta loogu tala galay calamadinta ama calamadahan kore mid aan ahayn uu codbixiyuhu isticmaalo codkaasi waa khasaaray.

Tirinta Codadka

Tirinta codadka waxay dhici doontaa isla-markiiba ka dib marka dhammaan ergada ay dhiibtaan codadkooda. Ergada iyo sidoo kale goob-joogayaasha, wakiilada musharraxiinta iyo wakiilada warbaahinta waxay joogi karaan xilliga tirinta codadka. Waxaa mamnuuc ah in maalinta cod-bixinta in sawirka musharax ama wax la xariira olalahisa ay yaalaan 100 mitir ee goobta cod-bixinta.

Tirinta codadka waxay ka koobnaanaysaa marxaladahaan;

- Furidda xarigga ku xiran sanduuqa
- Furidda daboolka sanduuqa codeynta
- Is dhex gelin waraaqaha cod-bixinta.
- Gooni-u-saaridda codadka khaldamay ee aan ansax ahayn, haddii ay jiraan.

- Kor u akhrinta magaca musharaxa ee ergaygu u codeeyay.
- Tirinta codadka ansaxa ah ee musharrax kasta.
- Ku qorista natiijada ee Foomka Natiijada
- Ku dhawaaqidda natiija horudhac ah ee musharraxa ku guuleysey tartanka

Kadib tirinta codadka ee musharrax kasta natiijooyinka waxaa lagu diiwaangalinayaa Foomka Natiijooyinka iyo Iswaafajinta.

Foomka Natiijooyinka iyo Iswaafajinta:

- Foomka natiijooyinka iyo iswaafajinta waxaa laga qaadaya sawir (scan) waxaan wakiilada GMDHDX hab iimayl (email) ugu dirayaa GHDHF. Haddii, wakiilo GHDHF aysan joogin waxa sawirka ka qaadaya oo diraaya xubnaha GMDHDX. Waxaa lagu dadaalaya in dhammaan goobaha ay leeyihiin khad (internet) ku filan. Balse, haddii khad internetka la heli karin foomamka waxa sawirka (scan) loogu qaadaayaa xafiiska GMDHDX.
- Natiijooyinka horudhac ah waxaa la galinaaya barta/mareegtada GHDHF: www.doorashada2021.so/results.

Dhacdooyinka Isdabajoogga ah ee Codeynta

Kursiga ay ku tartamayaan laba musharax oo kaliya waxey galayaan doorasho lagu kala guuleysanaa cod hal dheeri 50%+1 codadka ergada goob jooga ah ee codeeyay.

Hadii kursiga ay ku tartamayaan in ka badan labo musharax wareega koowaad waxaa guuleysanaya musharaxii hela 2/3 codadka ergada codeysay hadii la waayo waxaa wareega labaad u gudbayo labada musharax ee ugu codka badan, waxana guuleysanaa musharaxa hela 50%+1 codadka ergada goob jooga ah ee codeeyay

Maareynta iyo ku dhawaaqista Natiijooyinka

Hawl-wadeenada goobta cod-bixinta iyada oo ay goob-joog ka yihiin GMDHDX, GHDHDF, kor-joogayaal, warbaahinta iyo wakiillada musharraxiinta, waxay tirinayaan codadka ka dibna waxay shaxaynayaan natiijooyinka.

Haddii uusan khilaaf jiran, iyada oo ay goobjoog ka yihiin kor-joogayaasha, GMDHDX waxaa uu isugeynayaa natiijooyinka ka dibna wuu ku dhawaaqayaa marka uu hubiyo GHDHF. GMDHDX waxaa uu u gudbinayaa natiijooyinkaas xarunta dhexe ee guddiga GHDHF.

Natiijooyinka rasmiga ah waxaa la baahin doonaa ka dib 72 saacadood haddii aan wax cabasho ah la soo gudbin.

GHDHF waxaa uu ku dhawaaqayaa natiijooyinka kama dambaysta ah ee doorashada ee xubnaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Dowladda Federaalka ee Soomaaliya markay soo gudbiyaan GMDHDX.

Kadib dhammeystiridda tirinta natiijooyinka ku meelgaarka ah waxaa sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtagalka ah loo gelin doonaa mareegta doorashada (http://doorashada2021.so/results/).

Qofka guulaysta waxaa GHDHF siinayaa shahaado tilmaamaysa guushiisa xildhibaanimo.

Xallinta Khilaafaadka Doorashada (XKHD)

Mudada lagu guda jiro hawlaha doorashada, waxaa qayb ka ah oo dhinac socda shaqooyinka ay qabanayaan Guddiga Xalinta Khilaafaadka ee Doorashada, oo ay u joogaan xubno rasmiya oo metelaya guddiga goobaha doorashada, marka ay noqoto guddiga xulista ergada, liisaska ergada, musharaxiinta iyo baahinta natiijada kama danbaysta ah ee doorashada, waana muhiim in dhammaan la xaqiijiyaa hawlahaan in ay qabsoomeen.

Inta aan la wareejin dhammaan natiijooyinka iyo agabyada doroashada waa in la xaqiijiyaa in aysan harsanayn wax cabasha ah oo ay xalinayaan Guddiga Xalinta Khilaafaadka, aysanna jirin hawl taagan, waana in loo xaliyaa sida habraaca guddiga xalinta khilaafaadka iyo jadwalka doorashada ku qoran.

Kuwaasoo waafaqsan qodobadii ay soo saareen madasha wadatashiga Qaran ee kala ah:

1. Guddia xalinta khilaafaadku wuxuu ku dhamaystirayaa go'aaminta cabashooyinka muddo (7) maalmood gudahood ah oo ka bilamaanaysa maalinta cabashada la soo gudbiyey si dhamays tiran.
2. Guddiga waa in uu go'aamada cabashada ugu gudbiyaa dacwoodaha 24 saacadood gudahood marka go'aanka la qaato.